



Fariintan waxaa la soo geliyay iyadoo ku qoran Af Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt barta <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Noofembar 22, 2022

Ku socoto: Xubnaha bulshada I/DD, shuraakada Qabiileed iyo shaqaalaha ODDS

Ka socoto: Anna S. Lansky, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

Mawduuca: Waad ku mahadsan tahay taageerada himiladda ODDS ee 2022

Xiliga qaboobaha iyo damaashaadka uu wato ayaa soo dhow. Qaar badan oo idinka mid ah ayaa laga yaabaa inay si dhaqso ah isu imaadaan qoyskooda, asxaabtooda iyo bulshadooda. Fasaxyada iyo dhammaadka sannadka ayaa bixinaya fursad aan dib ugu milicsano wixii la soo dhaafay aana ku muujino mahadnaqayaga.

Sannadkan wuxuu watay caqabado iyo fursado badan. Mahadi ha ka gaarto dadaalkaaga iyo ficilkaaga, kiisaska COVID-19 iyo heerka dhimashada ayaa si weyn hoos u dhacay marka loo eego bulshada I/DD ee ku sugan Oregon. Weli, cudurka COVID-19, [RSV](#) iyo xannuuno kale oo halis ku ah fayo-qabka bulshadeena, gaar ahaan dadka halista sarreysa ugu jira xannuunada daran. Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa bixiya [talooyinka ku saabsan badqabka cuntada xilliga shirarka fasaxa](#). Waad ku mahadsan tahay inaad ilaaliso caafimaadka dadka ka tirsan bulshada I/DD.

Xafiiska ODDS wuxuu sameeyay isbedel weyn sannadkan. Waad mahadsan tihiin, shaqaalaha ODDS iyo danwadaagta, kuwaasoo aniga iyo maareeyayaasha naga caawiyay kala guurka hoggaanka hadda jira ee ODDS. Inaad waqti u hurtay shaqadan waa mid cajiib ah.

Waad mahadsan tihiin, isku-doodayaasha, xubnaha qoyska iyo danwadaagta, falcelinta aad bixiseen markay ODDS horay ugu gudbaysay

hindisaheeda istaraatiijiyadeed. Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay inaan si wanagsan u hirgelino oo u xoojino aragtida Waaxda Adeegga Aadanaha ee Oregon ee [Equity North Star](#).

Safarka lagu gaari lahaa xaqsoorka iyo helitaanka dhab ah waa mid socda waana hawl adag. Toddobaadkan, qalbigaygu wuxuu si gaar ah ayuu ula jiraa danwadaagta iyo qoysaska Qabaa'ilka maadaama ay ka war sugayaan masiirka [Xeerka Daryeelka Carruurta Hindida](#). Qalbigaygu sidoo kale wuxuu la jiraa bulshada LGBTQIA2S+ kadib toogashadii ballaaranayd ee ka dhacday Colorado isbuuc-yaaqadan inta lagu gudajiray Maalinta Xusuusta Laga-roonaha/Sini-guurka. Xilli-sannadeedka soo socda ha kuu noqdo mid soo kabasho iyo rajo. Waxaan sii wadi doonaa inaan ka wadashaqeyno xaqsoorka iyadoo aan wajahayno caqabadaha taagan iyo kuwa mustaqbalka.

Waad ku mahadsan tihiin, dhammaantiin, ka caawinta ODDS inay bixiso adeegyada, taageerooyinka iyo u-doodida xuquuqaha si ay awood ugu yeeshaan reer Oregon inay si buuxda nolol fiican ugu noolaadaan bulshadooda dhexdeeda. Wadajir ahaan, ayaan saamayn ugu leenahay nolosha in ka badan 32,000 oo qof iyo qoysaskooda!

Waxaan idiin rajaynayaa dhammaantiin dabaaldegyo wanaagsan oo ammaan ah xilligan gaboobaha.

Daacadnimo,



Anna S. Lansky  
Agaasimaha Ku Meelgaarka ah  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

*Farriimaha Agaasimihii Hore ee ODDS waxaa laga heli karaa barta <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo booqo mareegtayada.*

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Oregon Office of Developmental Disabilities Services lambarka 503-945-5811. Waxaan ka aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka dhegoolaha ah, kuwa dhegaha-indhaha la', kuwa dhego culus ama leh naafo xagga hadalka ah. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).